




**AXDIGA
HAWEENKA
SOOMAALIYEED**

**SOMALI
WOMEN'S
CHARTER**

Xusidda **AUN CABDIRAXMAAN XOOSH JIBRIIL**, Wasiirka Arrimaha Dastuurka

Horudhac Marwo Deeqa Yaasin,

Wasiirka Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha



Soomaaliya waxaa ka baxay hoggaamiye si weyn loo xurmeeyo oo ku caan baxay u ololeynta xuquuqda haweenka iyo dadka xuquuq raadiska ah: **AUN CABDIRAXMAAN XOOSH JIBRIIL**, Wasiirkeennii hore ee Arrimaha Dastuurka, waxuu geeriyooday 8dii Maarso 2019ka, Ilaahay ha u naxariisto.

Mudane Xoosh waxa uu ku dhashay waxna ku bartay Soomaaliya. Waxa uu shahaadooyin jaamacadeed ka qaatay Jaamacadda Toronto iyo Dugsiga Sharciga ee Osgoode ee ku yaalla dalka Kanada, asaga oo ku takhasusay cilmiga bulshada iyo sharciga. Waxa uu ahaa mas'uul ku howlan dib u dhisidda mustaqbalka Soomaaliya iyo daryeelka kuwa la takooro ayada oo uu u adeegsanayo khibraddiisa iyo garaadkiisa. Inta uu dalka Kanada joogay waxuu ahaa u ololeeye bulsho iyo qareen diiradda saarayay difaaca xuquuqda dadka qaxootiga, muhaajiriinta oo ay ku jirto xuquuqda haweenka.

Wasiir Xoosh waxa uu soo noqday xubin ka tirsan baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyadoo uu labo jeerna noqday Wasiirka Arrimaha Dastuurka. Waxa lagu xasuusan doonaa in uu ahaa qof mar walba si mas'uuliyad ku dheehan tahay u qaban jiray shaqadiisa, si daacadnimo leh, dadnimo ku jirto, maskax furan asaga oo doonayay inuu arko qof kasta in uu helo waxa ugu fiican. Waxa uu ahaa shaqsi dadka ku dhex jiro oo aan isla weyni ku jirin. Wasiir Xoosh waxuu ahaa qof mar waliba ka shaqeeya oo xoogga saara waxa bulshada Soomaaliyeed mideeya isla markaana ka fogaada arrin kasta oo tafaraaruq keeni karta.

Waxaan ku xusuusan doonnaa Wasiir Xoosh ballanqaadkiisii dhabta ahaa iyo doorkii muhiimka ahaa ee uu ka qaatay xaqiijinta in dhammaan umadda Soomaaliyeed ay si buuxda uga qeyb qaataan dib u dhiska dalkooda oo mideysan oo ay nabad buuxda ka aslaaxday. Shaqsi ahaan, waxaan waayay walaal iyo saaxiib qaali ah oo mar walba si farxad leh ula tacaali jiray caqabadaha waaweyn. Waxaan murugada la qaybsanayaa marxuumka qoyskiisa, gaar ahaan wiilashiisa Sooyaan iyo Jibriil iyo gabadhiisa Sagal.


Qaban qaabiyayaasha Shirweynaha Haweenka Soomaaliyeed waxay ku xisaabtami doonaan taageerada qiimaha laheyd ee Wasiir Xoosh. Shirweynaha iyo Axdiga Haweenka Soomaaliyeed waxaa uu ka kooban yahay mabaadi'yo badan oo Wasiir Xoosh uu si adag ugu istaagay kuwaas oo kala ah: midnimo, ka qaybqaadasho loo dhan yahay iyo dhowrista xuquuqda aadanaha.

Tusaaleyntii Wasiir Xoosh waa ay sii socon doontaa si ay noogu noqoto hage iyo himilo aan dhammaanteen u istaagno sidii ay mustaqbal wanaagsan Soomaaliya u yeelan lahayd.

Buugani waxaa lagu xusayaa Wasiirka iyo dhaxalkiisa waara.

Dedication to H.E. **ABDIRAHMAN HOSH JIBRIL**, *Federal Minister of Constitutional Affairs*

A foreword by **H.E. Dega Yasin Hagi Yusuf**,
Federal Minister of Women and Human Rights Development



Somalia mourns the loss of a great statesman and champion of women's rights:
H.E. ABDIRAHMAN HOSH JIBRIL, our Federal Minister of Constitutional Affairs,
who passed away on March 8, 2019.

Born and schooled in Somalia, Honourable Hosh subsequently earned degrees in Sociology and Law at the University of Toronto and Osgoode Law School in Canada. Committed to the future of Somalia and the welfare of those most excluded, he went on to use his expertise and tremendous intellect to serve as a community activist and lawyer with a focus on refugees, immigration and human rights, including the rights of women; a member of parliament; and a two-term Minister of Constitutional Affairs. He did so with integrity, humility, an open mind and an unwavering ability to see the best in each and everyone. A true man of the people, he focused on what unites us beyond our different backgrounds or status in society.

As a country, we will remember his true commitment and important contributions to the full participation of all Somalis, including women and girls, in building a united, inclusive and peaceful Somalia.

On a personal level, I will miss a dear friend who knew how to tackle great challenges with a contagious sense of humour. My thoughts are with his family, his sons, Soyan and Jibril and his daughter Sagal, who were his greatest pride and joy.

The organizers of the Somali Women's Convention could count on the valuable support of Minister Hosh. The Convention and the Somali Women's Charter embodied many principles that Minister Hosh firmly stood for: Unity, inclusive participation and human rights for all. It is now time to work together to translate these principles and the demands of the Charter into action. In this endeavour, we will miss the treasured advice and contributions of Minister Hosh. His example will continue to serve as a guide and inspiration for all of us as we work towards a better future for Somalia.

This booklet is dedicated to the Minister and his lasting legacy.

HORUDHAC

Shirka Haweenka Soomaaliyeed iyo Axdiga Dumarka

Qorshaha Horumarinta Qaranka (2017ka-2019ka) ee Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa uu aqoonsanayaa “in nabadda, xasiloonida iyo horumarka lagu gaari karo oo kaliya si wax ku ool leh marka wax laga qabto dhibaatooyinka haweenka wajahaya si ay uga qayb qaataan horumarinta dalka”. Ajeendaha 2030ka ee Midowga Afrika, qaraaryada Golaha Ammaanka ee Qarammada Midoobey (UNSC) ee tirsigoodu yahay 2282 iyo 1325, qaraarrada daba socday, iyo heshiisyada kale ee caalamiga ah ee xaqiijinaya in kor loo qaado awoodda haweenka ee goobaha ay colaaddu saameeyeen ayadoo ay ujeedada ugu muhiimsani ay tahay mid mudnaanteeda leh oo lagama maarmaan u ah nabad waarta iyo horumarin.

Dadaallada hadda jira ee dib u eegista Dastuurka Soomaaliya iyo soo saarista hindise sharciyeedka doorashooyinka ayaa siinaya fursado muhiim u ah si kor loogu qaado horumarinta haweenka. Ka faa'iideysiga fursadahan oo dhiirigelinayo xuquuqda haweenka waxay u horseedi karaan fursado aan horey loo arkin oo haweenka awood siinaya maanta iyo jilalka soo socda. Haddii aan si dhab ah fursadahaan looga faa'iideysan waxay keeni karaan in la lumiyo guulihii haweenku horey u gaareen.

Shirweyne qaran oo ay soo qaban qaabisay Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha ayaa waxaa isugu yimid ergo gaaraysa 350 haween ah iyo kuwa u ololeeya horumarinta jinsiga. Ergadaan waxay ka kala socotay gobollada dalka iyo qurba joogta. Shirweynaha oo billawday 04ta Maarso soona gabagaboobay 06da Maarso ee 2019ka waxaa looga gol lahaa kor u qaadista wacyiga dib u eegista dastuurka iyo sharciyada doorashooyinka ay u leeyihiin haweenka Soomaaliyeed iyo xuquuqdooda.

Shirweynaha waxaa ka soo qayb gashay Marwada koowaad ee Soomaaliya iyo Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya.

Ka dib seddex cisho oo wadahal ah, ka qeyb galayaashu waxay isku raaceen in ay si wadajir ah u xaqiijiyaan xuquuqda haweenka Soomaaliyeed ayagoo go'aannadooda ku caddeeyay '**Axdiga Haweenka Soomaaliyeed**'. Dhammaadkii shirweynaha, Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya ayaa muujiyay sida ay uga go'an tahay inuu Axdiga Haweenka Soomaaliyeed uga dhigo mid taabba gala.

Si loo hubiyo in Axdigu ku sameeyo isbaddal dhab ah nolosha haweenka Soomaaliyeed waxaa muhiim ah in dhammaan daneeyayaasha ku howlan dib u dhisidda dalka iyo ku soo dabbaalista nabad waarta ay xoogga saaraan fulinta Axdiga Haweenka Soomaaliyeed.

Ugu dambeyntii, buuggan wuxuu soo bandhigayaa Axdiga Haweenka Soomaaliyeed iyo go'aannadiisa. Qaban qaabiyayaasha iyo ergada Shirweynaha Haweenka Soomaaliyeed waxay rajeynayaan inaad si taxaddar leh u tixgelin doonto una faafin doonto si ballaaran go'aannadii ka soo baxay shirweynaha qaran iyadoo la eegayo muhiimadda ay leeyihiin sinnaanta jinsiga, nabadda iyo horumarka Soomaaliya. Sidaas darteed waxaa muhiim ah in aan si wadajir ah uga wada shaqeyno sidii uu Axdigan ku noqon lahaa mid dhaqan gal ah.

INTRODUCTION

The Somali Women's Conference and the Women's Charter

In the National Development Plan (2017-2019), the Federal Government of Somalia recognizes that 'Peace, stability and development can only be effectively achieved by addressing the obstacles women face to fully contribute to their country's development.' Agenda 2030, UN Security Council Resolution (UNSCR) 2282, UNSCR 1325 and follow-up resolutions, and other international agreements affirm that advancing women's empowerment in conflict-affected settings is both a key objective in its own right and a precondition for sustainable peace and development.

Current efforts to review Somalia's constitution and the development of a new electoral law provide a critical window of opportunity to advance this agenda. Using these opportunities to promote women's rights could lead to a watershed for women's empowerment – today and for generations to come. Failure to do so will lead to a loss of hard-won achievements, including recent progress in women's political representation.

To help ensure these windows of opportunity are seized, 350 women and gender champions from across Somalia and the diaspora convened in Mogadishu on 04-06 March 2019 for a three-day Women's Convention. The Convention aimed to raise awareness of the review of the constitution and the electoral law, as well as other openings for women's rights; to build new alliances for advocacy on gender equality and women's empowerment; and to provide women with an opportunity to develop joint demands for their rights in the constitution, the electoral law and beyond.

The agenda for the Convention was developed under the leadership of the Ministry of Women and Human Rights Development with a Steering Group composed of leaders who have made – and are making – critical contributions to the promotion of women's rights and empowerment in government, parliament, civil society, the private sector and the media, ensuring full inclusivity. The First Lady of Somalia and Somalia's Prime Minister opened and closed the event. The event generated high levels of interest and discussion on social media.

Following three days of discussions, participants agreed a set of joint demands for women's rights: the '**Somali Women's Charter**'. At the end of the Convention, Somalia's Prime Minister expressed his commitment to make this Charter a reality.

To ensure that the Charter makes a real difference in Somali women's lives, all stakeholders involved in the on-going processes aimed at promoting state-building, sustainable peace and development in Somalia must be aware of the Women's Charter and use it as guidance for their engagement.

To this end, this booklet presents the Charter with its demands. The organizers and delegates of the Somali Women's Conference hope that you will consider them carefully and circulate them widely. In the interest of gender equality, peace and development and Somalia, we have to work together to make the Charter a reality.

AXDIGA HAWEENKA SOOMAALIYEED

Horudhaca:

Annagoo ah Haweenka Soomaaliyeed iyo wax garadka u hiilliya Xuquuqda Dumarka Soomaaliyeed, waxaan ku midaysan nahay xaqiijinta mawqifyada hoos ku qoran:

- In midnimada dumarka Soomaaliyeed ay tahay lama taabtaan, innagoo matalayna dhammaan qeybaha kala duwan ee haweenka Maamul- Goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federalka iyo Gobolka Banaadir haddii ay noqon lahayd haweenka ku nool miyiga, magaalooyinka iyo qurbo joogtaba, gaar ahaan, haweenka naafada ah, gabdhaha dhalinyarada, kuwa guri-joogtada iyo kuwa waayeelka ah.
- Annagoo dhammaanteen ku midaysan mabaadii'daan, waxaan ku baaqaynaa in Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lagu asteeyo qodobbo aan shuruudi ku xirnayn oo lagu caddaynayo sinnaanta jinsiga, xuquuqul aadanaha iyo awoodsiinta haweenka;
- Waxaan dalbanaynaa in cadaaladda, sinnaanta iyo xaq ahaanshuhu saldhig u noqdaan nabad iyo horumar loo dhan yahay ee dalka.
- Waxaan annagoo wada soconno, si wadajir ah uga hawlgalaynaa nabadda iyo ka qeyb qaadashada hannaanka siyaasadeed, taas oo inoo horseedi doonta nabadgalyo, xasillooni iyo horumar waara ee ka taabba gala dalka.
- Waxaan isbeddel wax ku ool ah gaari karnaa, markii aan si buuxda is kula meel dhigno muhiimadda ay leedahay wadajirka ragga iyo haweenka. Adduunka waxaa ka socda dabeeylo isbeddel, oo saameeyay garaadka iyo fikirka bini'aadamka. Sidaa awgeed, waa inaan si wadajir ah u wajahnaa caqabadaha na horyaalla, si aan u xaqiijinno in isbeddalladaasi noo horseedaan horumar iyo nabad waarata ee Soomaaliya ka taabba gasha.



SOMALI WOMEN'S CHARTER

Preamble:

We, the women of Somalia affirm that:

- The unity of Somali women is sacred. In this spirit, we represent diverse groups of women in the Federal Member States and the Benadir Region, including those living in rural and urban areas and diaspora, women living with disabilities, young women and girls and elder women;

- In unity, we call for the Constitution of the Federal Republic of Somalia to enshrine the unconditional commitment to gender equality, human rights and empowerment of women;

- We demand for non-discrimination, equality, equity, justice and fairness to form the cornerstones of inclusive peace and development;

- We are equal partners working for peace and political processes, leading us towards security, stability and sustainable development for all; and

- We will drive positive change if we are fully acknowledged as equal partners. The world is changing, the planet is changing, and minds are changing. Collectively we address our common challenges, using equal and complementary strengths to achieve peace and sustainable development for Somalia.

Siyaasad Loo Dhan Yahay Oo Hufan Ayaa Saldhig U Noqon Karta Hannaan Dawladnimo Oo U Horseeda Nabad & Horumar Waara

Annagoo ah Haweenka Soomaaliyeed waxaan u taagan nahay inaan ka-qeybgalno siyaasad loo simman yahay, hannaan nabad dhisid iyo xaqiijinta isla xisaabtan dhab ah oo ku wajahan madaxda ugu sarreysa ee dawladda.

Sidaa awgeed, waxaa xaqiiq ah inaan la heli karin nabad iyo horumar waara ee waddan ka hirgala, haddaanay haweenku si dhab ah uga qayb qaadan siyaasadda dalka.

Haddaba, si wax looga qabto dhaqammada haraadiga ah ee haweenka lagu faquuqo, waxaa lagama maarmaan ah in la hirgaliyo saami qeybsi aan ka yarayn boqolkiiba 50% ee dhammaan matalaadda laamaha saddexda ah ee kala duwan ee hay'adaha dawladda, dhammaan guddiyada heer qaran ee madaxa bannaan, dhammaan Dawlad Gobaleedyada xubnaha ka ha DFS, haddii ay ahaan lahayd kuwa la soo doorto iyo kuwa la soo magacaabo.

Waxaan si adag ugu dalbaynaa in haweenku si mug leh uga dhex muuqdaan hawlaha dib u eegista Dastuurka iyo shuruucda la xiriirta doorashooyinka, iyadoo lagu salaynayo saami qaybsi isu dheelli tiran, si loo xaqiijiyo ka qayb-gellidda hoggaaminta buuxda ee haweenka.

Muddadii dheereed ee colaadahu dib noo dhigeen, Haweenka Soomaaliyeed waxay noqdeen kuwii guntiga u xirtay sidii ay u kafaala qaadi lahaayeen qoysaska iyo bulshada Soomaaliyeed, iyagoo badbaadiyay hantida bulshada iyo guud ahaan qaranka.


Haweenka ayay ahaayeen kuwii u istaagay dadaalladii loogu jiray dib u heshiisiinta lagu xaqiijinayey helitaanka dawladnimo Soomaaliyeed, si colaadaha dhiigga badani ku daadanayo looga gudbo. Markii aan ka gudubno caqabadaha naga soo wajahaya dhaqammadii haraadiga ahaa ee dumarka dib u dhigayey, waxaan si wadajir ah ugu guulaysanaynaa xaqiijinta bulsho dhammaanteed ku wada nool nabad iyo horumar guud oo dhan walba ah.

Uga danbeeyntii, waxaan soo jeedinaynaa in shuruucda ku aadaan doorashooyinka guud ee dalka loogu dhaqmo sida ay u qoran yihiin, laguna dammaanad qaado Dastuurka Dalka.

Sinnaanta Iyo Kala Sarrayn La'aantu Waa Lama Huraan

Haweenka Soomaaliyeed waa laf dhabarka iyo hal adaygga bulshada, mar walbana u taagan inay kaabaan shaqada ragga, sidaa darteed, ka qayb qaadashadooda buuxda waxay muhiim u tahay horumarka dhinacyada siyaasadda, bulshada, dhaqaalaha iyo sugidda amniga.

Waxaa naga go'an inaan si dhammaystiran uga hawlgalno dhammaan qeybaha kala duwan ee dawladda iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay. Waxaan u taagannahay inaan xaqiijinno in la qaado tallaabooyin sad kordhis ah, lana helo halbeeyo lagu cabbiro xaqiijinta gaaritaanka hadafyada aan ka leenahay sinnaanta.



Full inclusion is the foundation of effective governance, sustainable peace and development

We, the Somali women, resolve to realize equal participation in all political and peacebuilding processes and accountability from the highest officials of the state. Without women's political participation there can be no sustained peace and development.

In order to address structural and historical discrimination, a quota is required to reflect a 50/50 gender divide: not less than 50% of any sex to be represented across the three branches of government, all independent commissions, across all federal member states and all levels of governance, whether in elected or appointed positions. We demand that women are equally represented in the constitution review process, that the constitution, the electoral and political party law advance women's representation and participation in electoral and political party processes and enshrine the 50/50 quota, making women's full inclusion and leadership a reality.

During decades of conflict in Somalia, Somali women were a formidable force sustaining families and communities; we women continued to support our children, our young people, vulnerable members in our communities, and kept our family and community assets safe. We sustained livelihoods and governance when our men were fighting. By overcoming historical disadvantages and discrimination, together, we can achieve a peaceful society where development for all is the responsibility of all.

Equality, equity and non-discrimination are essential

Somali women are resourceful, resilient and a bedrock of our society. Complementing the work of men, our equal participation is essential to the social, economic and political development of Somalia.

We commit to full participation in every sphere of public and private life. We will strive for affirmative actions and accountability measures to attain the goals of equality.

Ciribtirka Tacaddiyada Ku Salaysan Jinsiga

Haweenka Soomaaliyeed waxaa ka go'an dardargelinta iyo kor u qaadidda dadaallada lagu ciribtirayo dhammaanba tacaddiyada ka dhasha bulshada dhexdeeda ee sida gaarka ah ugu dhaca dumarka iyo gabdhaha da'da yar. Tacaddiyada kufsiga, gudniinka iyo kuwa ku salaysan jinsiga ee dhaca xilliyada colaadaha; arrimahaasi waa waxa dib u dhaca u horseeda bulsho kasta, raad fogna ku reeba qofnimada haweeneed; intooda badanna waxay saameeyaan haweenka.

Waa in Dastuurka dalka si bayaan ah loogu qoraa qodobbo ilaalinaya xuquuqda kala duwan ee haweenka u gaarka ah, sida xaqa illaalinnaya tacaddiyada ka dhanka ah jinsiga; isla markaasna, waxaan ugu baaqaynaa labada Gole ee Baarlamaanka inay culaayska saaraan sidii loo ansixin lahaa Hindise-sharciyeedka danbiyada Jinsiga iyo ciribtirka Gudniinka.

Caddaalad Loo Simman Yahay

Inta badan waxaa lagu xad gudbaa xuquuqda haweenka, waxayna ka dhalataa nabadgalyo la'aanta guud ee jirta iyo ku dhaqmid la'aanta shuruucda dalka. Sidaa awgeed, annagoo ah Haweenka Soomaaliyeed, waxaan dalbanaynaa ansixinta shuruuc si gaara ah u dhowraysa sinnaanshaha xuquuqda haweenka, taas oo ka hortegaysa faquuqidda dumarka. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinaynaa in la ansixiyo Hindise-sharciyeedka Danbiyada Jinsiga ee hadda horyaalla Barlamaanka Federaalka, shuruucdii horey u jirtayna lagu sii dhaqmo.

Haddaba, si xal loogu helo dhaqammada haraadiga ah ee dib u dhaca ku riday haweenka, waxaan dalbanaynaa inaan helno ka qaybgal dheellitiran ee ah ugu yaraan 50%, matallaadda hay'adaha caddaaladda iyo sharciga sida horumarinta sarreeynta sharciga iyo dib-u-eegista dastuurka.


Waxaan soo jeedinaynaa sharci dhaqameed walba oo ka hor imaanaya diinta islaamka, shuruucda dalka iyo sharciyada caalamiga ah ee ku aadan Xuquuqda Aadanaha iyo Xuquuqda Haweenka in dalka laga mamnuuco.

Saraakiisha dawladda iyo hoggaamiyayaasha dhaqanka ee gacanta ku haya howlaha maamulka caddaalladda iyo amniga waa in kor loo qaadaa aqoontooda ku aadan muhiimadda sinnaanta jinsiga iyo xeerarka iyo mabaadi'da u degsan xuquuqda haweenka, isla markaana ay faham buuxa u yeeshaan jiritaanka shuruucda dalka, kuwa heer Goboleed iyo kuwa Caalamiga ah oo la cuskan karo.

Dib U Heshiisiinta Iyo Nabadgalyada Haweenka Ee Xudunta U Ah Xilli Kala Guurka Caddaaladeed

Haweenku waxay kaalin muhiim ah ka qaataan dib u heshiisiinta ummadda. Waxaan ku baaqaynaa in Guddiga Caddaaladda iyo Dib u heshiisiinta, si joogta ah ugu xusnaado Dastuurka, waxaana muhiim ah in xubnaha guddiga ay ragga iyo haweenku u qaybsadaan 50/50%, maadaama si gaarka ah ay collaadahu iyo khilaafyadu u saameeyaan dumarka, si ay si buuxdana uga qaybqaataan dib u heshiisiinta iyo maamulka caddaalladda.

Haddaba, si loo helo nabad waarta oo ku qotanta xilli kala guurka caddaaladeed, waxaa muhiimad gaar ah noo leh xaqiijinta nabadgalyada haweenka si xal waara looga gaaro dagaallada, loona helo caddaalad bulsho xilliga kala guurka caddaalladeed.



Zero tolerance for gender-based violence (GVB)

The women of Somalia are committed to accelerate efforts to eliminate all forms of violence against women and girls. Somali women and girls are impacted by both conflict-related sexual violence and other forms of sexual and gender-based violence, including female genital mutilation. This violence destroys societal cohesion and women's lives, undermining the capacity of women to meaningfully participate and contribute to societal development. Only with zero tolerance for GBV and harmful traditional practices will Somalia become a prosperous nation.

We demand that the Constitution makes explicit that the right to safety and security includes women's right to be protected from gender-based violence, both in and outside of the home. We call for the immediate passing and enforcement of the Sexual Offences Bill and anti-FGM legislation.

Justice for all

Women's rights are routinely violated and adversely affected by prevailing insecurity and the absence of appropriate legal protection. We, the women of Somalia, demand holistic and specific sets of laws that effectively sanction and secure gender equality and women's rights, and which make discriminatory acts punishable. We further demand full participation, a minimum of 50% representation, in the development of the Rule of Law system reform and the justice sector to address historical discrimination against women.

Any customary practices contrary to the Shari'a and international, regional or national laws on human rights and women's rights must be outlawed. Formal officials and traditional leaders entrusted with the administration of security and justice must be empowered to apply gender equality and women's rights principles and standards, provided for in domestic laws and regional and international instruments.

Reconciliation and peace for women at the center of transitional justice

Women play a crucial role in reconciliation. We demand that the justice and reconciliation commission remain in the constitution. It is essential that the members of the commission reflect a 50/50 gender divide. Women's active participation is essential to ensure differential experiences of conflict are addressed. Transitional justice that reflects women's concerns will lead to sustainable peace. As women we will put women's security and peace at the center of conflict resolution and transitional justice.

Awoodsiinta Dhaqaale Ee Haweenka, Ka Qeyb Galka Buuxa Ee Xuquuqda Bulsho-Dhaqaale Ayaa Saldhig U Ah In La Gaaro Horumar Iyo Sinnaan Waarta

Annagoo ah dumarka Soomaaliyeed waxaan doonaynaa in dastuurku xaqiijiyo in haweenku helaan fursado simman sida lahaanshaha hantida, ganacsiga, maalgashiga, khayraadka dabiiciga ah, teknoolajiyadda, adeegyada dhaqaalaha iyo qandaraasyada dawladda. Waxaan sidoo kale dalbanaynaa in dumarka ay helaan fursado simman oo ku aadan maalgashiga caalamiga ah iyo macaawinooyinka horumarinta. Tallaaabooyinkan kor ku xusani waxay muhiim u yihiin xaqiinta xuquuqda dumaraka ee bulsho-dhaqaale.

In badan oo dumarka Soomaaliyeed ka mid ahi waxay mas'uul ka yihiin nolosha qoysaskooda, haddana haweenku ma laha awood lahaansho oo ku filan hanashada qoysaskooda. Haweenku badanaaba waxay ka shaqeeyaan shaqooyin ka baxsan kuwa rasmiga ah iyo kuwa qoysaskooda. Sidaa awgeed, waxaan dawladda ka dalbanaynaa in ay xoojiso dhaqan gelinta xuquuqdeenna waxbarasho, caafimaad, guriyeen, shaqaaleeyn iyo keydin cunto, iyadoo loo marayo habka rasmiyaynta cad goynta u gaarka ah dumarka. Arrintan waa in lagu dabakhaa dadka nugul oo dhan, sida dadka naafada ah, dadka waayeelka ah, dadka barakacayaasha ah iyo dadka laga tira badan yahay oo muddada dheer lagu hayay faquuqa.

Waxaa kale oo aan ku baaqaynaa in shirkadaha iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay ay kordhiyaan mataallaadda dumarka ee xilalka dhinaca maamulka iyo hoggaanka haya, ayna siiyaan fursado cad goyn oo u gaar ahaan gabdhaha dhallinyarada ah. Maadaama collaadahii ay burburiyeen, dhibaatooyin badan u geeysteen kaabayaashii dhaqaale, waxaa muhiimad gaar ah la siiyay sidii dib loogu dhisi lahaa kaabayaasha ugu faa'iidada badan, muhiimaddana u leh dalka. Sidaa awgeed, dumarku waa inay fadhiyaan miiska go'aanka lagu gaarayo, si baahidooda gaarka ah iyo waayaha faquuq oo ay soo mareen wax looga qabto. Ugu yaraan waa in ay helaan matallaad ah 50% dhammaan hay'adaha dawladda taas oo shardi u ah dib u dhis macna badan yeesha.

Isbaddalka cimilladu wuxuu dumarka iyo gabdhaha ku hayaa culays gaar ah. Horumar waara iyo adkeysiga waxaa la gaari karaa haddii dumarka iyo gabdhaha la xoojiyo awooddooda, si simanna ay gacan uga geeystaan xal u hellidda isbeddelka cimillada iyo iyadoo si buuxda wax looga qabto waayaha gaarka ah oo ay soo mareen.


Hal Abuur Loo Dhan Yahay

Si loo horumariyo, loogana faa'iidaysto fursadaha ay keentay teknoolojiyada casriga ah, waddankuna uga soo kabto dib u dhicii ku yimid, waxaa loo bahan yahay in ragga iyo haweenka, dhallinyarada iyo waayeelku ay mideeyaan maskaxdooda iyo muruqooda.

Isbaddelka cusub ee teknoolojiyadu wuxuu ku socdaa xawli aan weli la arkin, wax waynna ka baddelay sida aan u helno akhbaarta, sida aan uga fal-celinno, sida aan u shaqayno iyo noocyada shaqooyinka aan qaban doonno.

Sidaa daraadeed, ma ahan in bulshadeennu, guud ahaan, u kala harto ka qayb qaadashada hawshan. Arrintani waxay muhiimad gaar ah u leedahay awoodsiinta haweenka si ay u yeeshaan ganacsigooda iyo hal abuurkooda, loona meel mariyo sinnaanta ragga iyo haweenka, iyadoo la adeegsanayo qaabka teknoolojiyadda casriga ahi ay inoo fududaynayso.

Haddaba, si arrintaan looga mira dhaliyo, annagoo ah Haweenka Soomaaliyeed, waxaan dalbanaynaa in waxbarashada khasabka ah la gaarsiiyo illaa iyo dugsi sare, haweenkana loo furo xarumo ay ku bartaan xirfado lagu kordhinayo aqoontooda oo ay ka helaan khibrado aqooneed oo kala duwan, sida cilmiga sayniska, teknoolojiyadda, muhandisnimada, xisaabaadka, iyo iwm.



Women's economic empowerment, full participation and socio-economic rights are cornerstones for equality and sustainable development

We, the Somali women, demand for the Constitution to guarantee us equal access, ownership and control over property, natural resources, technology, financial services, and government tenders; that all foreign investment and development assistance is assessed through a gender lens; and for women to be given equal opportunities in and access to these investments. These steps are key to securing our socio-economic rights. Many Somali households are headed by women, yet women have inadequate or no ownership and control over their houses. Women are more often outside the formal labor force and working in the household. We demand for the State to further strengthen in practice our rights in education, health, housing, employment and food reserve by institutionalizing affirmative actions in these areas. These are also to be applied to all vulnerable people, including those living with disabilities, older people, minorities who have long suffered discrimination and internally displaced people. We also call on the private sector to increase the representation of women in their top management and leadership positions and provide opportunities and affirmative action for women, including younger women.

As the conflict has destroyed or seriously dilapidated the economic infrastructure, priority has been given to rebuild the essential and most profitable infrastructure in the country. Women have to be at the table of decision making so that their specific needs and experiences can be addressed. A minimum of 50% representation across all formal consultations is a prerequisite for meaningful reconstruction. Climate change poses distinct, enormous burdens for women and girls. Sustainable development and resilience can only be achieved if women and girls are empowered to equally contribute to the resolution of climate change problems and their differential experiences are fully addressed.

Inclusive innovation

To develop new solutions for society and seize opportunities provided by technology, women and men need to think and act together; elder and youth need to join forces for the betterment of Somalia. The Information Technology Revolution is changing the way we receive information, how we process it, how we work and what jobs we will do. It is happening at an unprecedented pace. Women and men, young and old, experience these technological changes differently and have distinct contributions to make in the technological revolution. Because of this, we simply cannot afford to have any less than our whole population engaged and contributing. Therefore, it is of great importance to empower women as innovators and entrepreneurs and advance gender equality using innovative approaches which draw on new technologies and collective learning. To realize this, we Somali women demand to increase compulsory attainment of secondary education, access to tertiary education and skills training courses for women and girls and additional affirmative action in securing young girls' exposure to science, technology, engineering, and mathematics (STEM).

